



Tilmaamaha Farshaxanka Beeraha Nasashada ee 2026

Guudmarka Deeqda

Tan iyo 2016, Xafiiska Fanka iyo Dhaqanka ee Seattle (OAC) wuxuu iskaashi la sameeyay Waaxda Ciyaaraha iyo Madadaalada (PARKS) ee Seattle si loo kordhiyo kulamada fanka iyo dhaqanka ee ka dhaca jardiinooyinka magaalada oo dhan. Iyadoo la adeegsanayo barnaamijka Fanka ee Jardiinooyinka (AiP), Magaaladu waxay maalgelisaa shaqada dhaqameed ee firfircoon oo ay qabtaan bulshooyin kala duwan gudaha iyo guud ahaan Seattle.

Barnaamijkani wuxuu taageeraa ururada, kooxaha bulshada, ururada hoose, iyo fanaaniinta shaqsiyaadka ah ee doonaya in ay jardiinooyinka Seattle ka howl-galiyaan fanka iyo dhaqanka, gaar ahaan meelaha aan si fiican loo adeegsan oo dhaqaale ahaan xaddidan ee magaalada. Deeqdan waxaa ay taageertaa mashaariic cusub iyo kuwa horey u jiray oo kor u qaadaya ka-qaybgalka fanka iyo dhaqanka, una dabbaaldega kala-duwanaanshaha, una dhisaya midnimo bulsho iyadoo la xeerinayo dadweynaha ka tirsan bulshooyinka taariikh ahaan si buuxda loogu adeegin ama si yar loogu adeegay, kuwaas oo matalaya kala-duwanaanshaha Seattle.

Wixii macluumaad iyo taageero ah oo ku saabsan codsashada, dib-u-eegista codsiga, u-qalmiitaanka, amase taageerada farsamada ee khadka ah, fadlan la xirii **Zach Frimmel**, **Maareeyaha Mashaariicda Deeqaha**, taleenfka ah **(206) 963-9226** ama iimeyl kaZach.Frimmel@seattle.gov

Waxaan noo jooga turjubaano kugula hadli kara luqadaada, kuwaaso ay ku jiraan Luqadda Calaadaha Ameerika (muuqaal ahaan). Kaliya na soo wac oo noo sheeg luqadda aad ku hadasho. Fadlan sug qaddar yar inta aanu raadineyno turjubaan ku soo biira wicitaanka.

Codsiga (Arjiga)

[Ku Codso qaabka khadka](#) Iyadoo la adeegsanayo bogga deeqaha ee Magaalada Seattle.

Haddii aadan haysan kumbiyuutar ama internet, fadlan la xirii shaqaalaha sida ugu dhaqsaha badan.

Taariikhda ugu danbaysa ee la codsan karo

Talaado, Octoobar 28, 2025, 5 p.m. (Pacific)

Fadlan u ogolow wakhti ku filan markaad buuxinayso codsigaaga (arjigaaga). Codsiyada (Arjiyada) lasoo gudbiyo kadib 5 galabnimo (waqtiga Pacific) ee taariikhda kama dambaysta ah lama aqbali doono.

U-qalmitaanka

Waxa aad xaq u leedahay inaad codsato deeqdan haddii aad buuxiso shuruudaha soo socda:

- Waxa aad tahay shaqsi, urur, ama koox bulsho oo si joogto ah uga qaybqaata soo-bandhigidda barnaamijyo faneed iyo dhaqan ku saleysan ee gudaha Seattle.
- Waxa aad ku nooshahay Degmada King ama meel ka mid ah Degmada King oo aan si rasmi ah aa loo degin gudaha Gobolka Washington.
 - Ururada iyo fanaaniinta shaqsiyaadka ah ee matalaya bulshooyinka kala duwan ee Seattle waxaa lagu dhiirigelinayaa inay codsadaan.
- Waxa aad haysataa lambarka Aqoonsiga Canshuuraha ee Federaalka (Lambarka Caymiska Bulshada, ITIN, ama Lambarka Aqoonsiga Shaqaalaha).
 - Kooxaha loogama baahna inay noqdaan hay'ad aan faa'iido doon ahayn oo 501 (c) (3) ah, sidoo kale loogama baahna inay isticmaalaan kafaale maaliyadeed ama wakiil maaliyadeed.

Adiguuma qalantidin lagu gudoonsiiyo deeqda hadii aad haysato qandaraas socda kadib Dhiseembar 31, 2025.

Maalgelinta

Waxaad codsan kartaa cadadka soo socda:

- \$2,000
- \$4,000
- \$6,000
- \$8,000*

Aqoon isweydaarsiyada macluumaadka

Wax badan ka baro sida cogsigaaga (arjigaaga) deeqdan loo gudbiyo sida ugu wanaagsan.

Kalfadhiga 1-aad ee Macluumaadka (Fogaan-Arag)

Arbaco, Sabteembar 24, 3-4 p.m. (Pacific)

Fogaan-Arag ah: Microsoft Teams

[Fadlan iska diiwaangeli ka hor Sabteembar 24](#)

Kalfadhiga #2 ee Macluumaadka oo toos ah

Arbaca, Oktoobar 6-7:30 p.m. (Pacific)

Qof ahaan: Garfield Community Center (Xarunta Bulshada ee Garfield)

[Fadlan iska diiwaangeli ka hor Oktoobar 8](#)

Kalfadhiga Dib-u-eegista Codsiga Qabyada ah (Fogaan-arag ahaan)

Khamiis, Oktoobar 16, 4:3-6:00 p.m. (Pacific)

Fogaan-arag ahaan: Microsoft Teams

[Fadlan iska diiwaangeli ka hor Oktoobar 16](#)